# Hababka ka hortaga uurka

## Wax qabadka dhexe iyo wax qabadka gaaban ee ka hortaga uur

| | **Irbada ka hortaga uurka**<br>Depo-ProveraTM ama Depo – Ralovera, (waxaa kaloo yaqaan “depo”)<br> | **Fargashiga siilka**<br> | **Kiniiniga isku jira ee afka laga qaadanayo ee ka hortaga uurka**<br> | **Kiniiniga yaryar**<br> |
|---|---|---|---|---|
| **Waxtarka*** | • 94% | • Si fiican u isticmaalka: 99%<br>• Iska isticmaalka: 93% | • Si fiicsan u isticmaalka 99%<br>• Iska isticmaalka: 93% | • Si fiicsan u isticmaalka 99%<br>• Iska isticmaalka: 93% |
| **Waa maxay?** | • Irbad uu bixiyey dhakhtarku ama kalkaalisada caafimaadku.<br>• Wuxuu ka kooban yahay hormoon progesterone oo kale ah.<br>• Wuxuu joojiyaa bacrinta (ovulation) wuxuuna ka dhigaa dheecaanka ilmagaleenka mid adag, oo joojiya shahwadu inay soo gudubto. | • Faraati ayaa lagu xiraa siilka ‘cabirkiisu is wada walba legyahay.<br>• Wuxuu tartiib u sii daayaa hormoono ka yimid siilka oo gala xididada dhiiga si ay uga hortagaan uur. | • Hormoono saynteetik ah oo u qoray dhakhtar.<br>• Wuxuu joojiyaa bacriminta (ovulation) wuxuuna ka dhigaa dheecaanka irida ilmagaleenka mid adag kaas oo joojinaya in shahwadu ay soo gudubto. | • Wuxuu leeyahay qaab saynteetik ah oo hal hormoon ah; oo uu qoray dhakhtar.<br>• Wuxuuna ka dhigaa dheecaanka irida ilmagaleenka mid adag kaas oo joojinaya in shahwadu soo gudubto. |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | • Waa in la bedelaa afartii asbuucba (ka dib asbuuca caadadu kaa maqan tahay). | | |
| **Ilaa intee ayay qaadanaysaa?** | • **Wax qabasho dhexe –** maaha inaad xasuusato mar kasta oo aad galmood samayso. Waxay ku dhamaataa 12–14 asbuuc | • **Wax qabasho dhexe –** maaha inaad xasuusato mar kasta oo aad galmood samayso.<br>• Saddex asbuuc ka dib faraatiga waa la saarayaa asbuuc ka dibna faraati cusub ayaa lagu gelinayaa hal asbuuc ka dib. | • **Wax ka qabasho dhexe -** waa inaad xasuusataa inaad maalin walba qaadato. | • **Wax qabasho dhexe** - waa inaad xasuusataa inaad maalin walba qaadato. |
| **Faaiidooyinka** | • Qofka ma sheegi karo inaad isticmaalayso.<br>• Waa la isticmaali karaa marka la naas nuujinayo.<br>• Ma saamaynayaan daawooyin kale.<br>• Caadadaadu waxaa laga yaabaa inay soo khafiifto amaba joogsato. | • Adiga ayaa isgelinaya, wayna sahlan tahay in sidii taamboonaha la isu geliyo.<br>• Caadada wuxuu ka dhigayaa mid aan dhib lahayn.<br>• Wax yeelli mayso bacrimintaada. Ku saamayn mayso | Waxaa loo isticmaalli karaa si looga boodo caadada. | • Waxay ku haboon tahay kuwa aan qaadan karin oestrogen arrima caafimaad dartood.<br>• Waa la isticmaali karaa marka la naas nuujinayo. |
| **Waxyaallaha kale oo qadarinta mudan.** | • Waxaad u baahan tahay inaad xasuusato inaad qaadato qadar kale, isku waqti loogu talagalay inaad qaadato qadar kale, 12 ilaa 14 asbuucba, haddii kale waxtarkeeda hoos ayuu u dhacayaa.<br>• Waxaa laga yaabaa in dhowr bilood ka dib ay kuu soo noqoto caadadii iyo ugxan samayntii markaad joojiso isticmaalkeeda.<br>• Waxaa laga yaabaa inay hoos u dhigto cufka lafta. | • Laguma talinayo haddii aad khatar ugu jirto ku dhacda wadnaha, sida sigaar cabayaal ka weyn 35 sanadood. | • Wuxuu hoos u dhigi karaa khatarta kansarka endometrial iyo ugxan sidayaasha. | • Waxaa laga yaabaa in aanay waxtar u lahayn sida kiniiniyada la isku daro sababtoo ah waa in loo qaataa si taxadaran.<br>• Wuxuu keeni karaa saamayn kaleeto. |
| **Yaa isticmaali kara?** | • Waa amaan in la isticmaalo haddii aad naas nuujinayso, laakiin waxaa laga yaabaa in uu hoos u dhigo qadarka caanaha ah hadii ilmahaagu ka yar yahay lix bilood. | • Waxaa la isticmaali karaa 21 berri ka dib dhalashada ilmaha. | Laguma talinayo inay isticmaalaan kuwa khatarta ugu jira wadnaha oo ka weyn 35 sanadood. | kuma haboona haddii ay jiraan xaallada caafimaad oo kale (sida kansarka naaska) ama xaallad kale oo caafimaad. |

* isticmaalka ugu fiican= marka loo isticmaalo sida loogu talagalay.

* Iska isticmaalid = markaan aan loo isticmaalin si sax ah.

**Macluumaad intaas badan.**

Kondhom keliya ayaa ilaalin kara infakhshanka la isugu gudbiyo galmoodka (STIs).

Waxaa ansixisay oo daabacday Xukuumada Fiktooriya, 1 Treasury Place, Melbourne. © Dawlad Goboleedka Fiktooriya, Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga ah, Janaayo 2019.
Waxaa laga hellaa: <http://healthtranslations.vic.gov.au/>